



Xaashida Ka Qaybgalaha ee Daryeelka Loo Wada Dhan Yahay

Tilmaamaha: U isticmaal xaashidan si aad u qorto sida macluumaadkani ula xiriirayo shaqadaada la xiriirta dhallaanka, carruurta yaryar, iyo qoysaskooda, iyo si aad uga qaybqaadato hawlaha kulankaan. Haddii aad u baahato meel dheeraad ah oo aad wax ku qorto, isticmaal dhabarka dambe ee boggan.

Qoraallada Qodobbada Muhiimka ah ee Tababarka



Bogga 14. Sahminta Aragtideenna iyo Caqiidadeenna

- ◆ Maxaan ka jeclahay daryeelka loo wada dhan yahay?

- ◆ Waa maxay walwalka aan ka qabo daryeelka loo wada dhan yahay?

- ◆ Qoyskaygu waxay u muuqdaan inay dareemayaan _____ oo ku saabsan daryeelka loo wada dhan yahay.

- ◆ Waxaan dareemayaa in mustaqbalku uu carruurta socod-baradka ah ee leh naafo.

Bogga 18. Dib u milicsiga

- ◆ Sidee ayaa daryeelka loo wada dhan yahay loogu qeexay falsafadda, siyaasadaha, iyo hab-dhaqannada barnaamijka?

- ◆ Sideen u abuura deegaano soo dhaweynaya dhammaan carruurta iyo qoysaskooda?

Bogga 27. Qaabaynta Guud iyo Ka-mid-ahaanshaha

- ◆ Dib u milicsi wakhti aad geli weyday meel aad rabtay inaad gasho.
 - Sidee baad dareentay?

 - Maxaad samaysay?

- ◆ Haddana dib u milicsi wakhti ay wax si lama filaan ah kugu fududaadeen.
 - Maxaa dhacay?

 - Sidee baad dareentay?

Bogga 29. Tusaale Muuqaal ah: Abuuridda Mustaqbal Wanaagsan

- ◆ Waa maxay aragtida daryeelka loo wada dhan yahay ee muuqaalkalagu soo bandhigay?

Bogga 31. Tusaale Muuqaal ah: Khabiirka Baxnaanada ee Cuntada

- ◆ Sidee ayay Trever iyo carruurta kale uga falceliyeen qadada ay la cuneen Khabiirka Baxnaanada ee Cuntada?

Bogga 34. Aqoonso Tallaabo Kasta oo Yar oo Loo Qaado Daryeelka Loo Wada Dhan Yahay...Sababtoo ah Muhiim ayay u tahay Ilmo kasta!

- ◆ Qor fikradaha tallaabooyinka yaryar ee lagu hirgelin karo daryeelka loo wada dhan yahay ee adiga kugu habboon.



Bogga 35. Fikradaha Muhiimka ah

- ◆ Maxaa si gaar ah kuu soo jiidatay?
- ◆ Maxaad dooneysa inaad xasuusataa?
- ◆ Sidee ayay tani ula xiriirtaa shaqadaada?

Xarunta Dhisidda Awoodda Gobollada (State Capacity Building Center, SCBC) waxay la shaqaysaa hoggaamiyeyaasha gobollada iyo dhulalka ay dawladdu xukunto iyo la-hawlgalayaashooda si ay u abuuraan nidaamyo iyo barnaamijyo carruurnimada hore ah oo hal-abuur leh kuwaas oo sare u qaada natijjooyinka carruurta iyo qoysaska. SCBC waxaa maalgelisa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka, Maamulka Carruurta iyo Qoysaska, Xafiiska Daryeelka Carruurta.

State Capacity Building Center, A Service of the Office of Child Care

9300 Lee Highway
Fairfax, VA 22031

Taleefoonka: 877-296-2401
limaylka: CapacityBuildingCenter@ecetta.info

Isdiwaangeli si aad u hesho Wararka cusub
http://www.occ-cmc.org/occannouncements_sign-up/



ADMINISTRATION FOR
CHILDREN & FAMILIES



Daryeelka Loo Wada Dhan Yahay

U isticmaal ilahan si uu kaaga caawiyo caddeynta muhiimadda hirgelinta daryeelka loo wada dhan yahay ee loogu talagalay dhallaanka iyo carruurta socod-baradka ah ee leh xaalado naafonimo ama baahiyo gaar ah oo kale. Waxa uu gacan ka geysanayaa dhiirrigelinta hab-dhaqannada muhiimka ah ee barnaamijyada si loo hubiyo tayada daryeelka qoysaska ee carruurta lagu daryeelo guryaha iyo xarumaha, kuwaas oo u adeegaya dhallaanka iyo carruurta yaryar.

Mabda'a

Daryeelka-tayada sare leh-ee ku saleysan xiriirka ayaa door muhiim ah ka ciyaara Waynaanta Maskaxda ee carruurta, xakamaynta shucuurta, iyo barashada (Center on the Developing Child, 2012). Barnaamijka Daryeelka Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar (Program for Infant/Toddler Care) wuxuu ku talinayaa lix hab-dhaqan oo muhiim ah oo barnaamijyada ah, kuwaas oo u ah qaab-dhismeedka daryeelka ku saleysan xiriirka. Mid ka mid ah hab-dhaqannadan waa **daryeelka loo wada dhan yahay**—kaas oo ah ku-daridda firfircoon ee dhallaanka iyo carruurta socod-baradka ah ee leh naafonimo ama dib-u-dhac korriineed goobaha daryeelka kooxeed, iyada oo la siinayo adeegyo iyo taageero ku habboon (Lally & Mangione, n.d.).

Daryeelka loo wada dhan yahay wuxuu ka dhigayaa faa'iidooyinka daryeelka tayada sare leh kuwo ay heli karaan dhammaan carruurta, oo ay ku jiraan carruurta leh naafonimo la aqoonsaday iyo kuwa u baahan gargaar ama taageero dheeraad ah sababo la xiriira shucuurtooda, caafimaadkooda, ama arrimo korriineed. Marka barnaamijyadu bixiyaan adeegyo iyo taageero ku habboon si loo daboolo baahiyaha dhammaan carruurta, qof walba ayaa ka faa'iidaystaa.

Xuquuqda helitaanka barnaamijyada carruurnimada hore ee loo wada dhan yahay waxaa taageera shuruuc iyo siyaasado adag. Inkasta oo ay jiraan sharciyadan iyo siyaasadaha adag, haddana carruur badan oo yaryar oo leh naafonimo ama dib-u-dhac korriineed iyo qoysaskooduba weli waxay wajahaan caqabado ku aaddan helitaanka barnaamijyo carruurnimada hore oo tayo sare leh oo loo wada dhan yahay. Abuuridda “dhaqan heer qaran ah” oo daryeel loo wada dhan yahay ah oo loogu talagalay dhallaanka iyo carruurta socod-baradka ah ee leh naafonimo ama dib-u-dhac korriineed waxay u baahan tahay qorshayn dhab ah iyo ka-qaybgalka dhammaan barnaamijyada iyo adeegyada carruurnimada hore (U.S. Department of Health and Human Services & U.S. Department of Education, 2015, p. 3).

Maxay muhiim u tahay daryeelka loo wada dhan yahay ee Dhallaanka iyo carruurta socod-baradka ah?

- ◆ Dhallaanka iyo carruurta socod-baradka ah oo dhan waxay xaq u leeyihiin in laga qaybgaliyo jawi daryeel oo tayo-sare leh.
- ◆ Barnaamij daryeel oo loo wada dhan yahay oo loogu talagalay dhallaanka iyo carruurta socod-baradka ah waa mid faa'iido iyo dhiirrigelin u leh dhammaan carruurta, qoysaska, iyo shaqaalaha ku jira barnaamijka daryeelka carruurta (California Department of Education, 2009).
- ◆ Qoysaska dhallaanka iyo carruurta socod-baradka ah, gaar ahaan kuwa leh naafonimo ama dib-u-dhac, korriineed, waxay ka faa'iidaystaan barnaamijyada carruurnimada hore ee-tayo sare leh ee si wanaagsan ula xiriira-kheyraadka ku saleysan bulshada (Hebbeler et al., 2007).
- ◆ Daryeel-bixiyayaashu waxay kordhiyaan xirfadahooda iyo aqoontooda ku saabsan dhammaan carruurta, oo ay ku jiraan kuwa leh naafonimo ama dib-u-dhac korriineed, marka daryeelka loo habeeyo si gaar ah carruur kasta loona hirgeliyo daryeelka loo wada dhan yahay (Raikes & Edwards, 2009).

- ◆ Ka-mid-ahaansho firfircoon oo qofku xubin ka yahay bulshada waa xuquuq qof walba u taalla laga bilaabo xilliga dhalashada, sida ay taageerayaan sharciyada federaalka ah oo ay ka mid yihiin Qaybta C ee Xeerka Waxbarashada Shakhsiyaadka Naafada ah, Xeerka Maraykanka ee Naafada, iyo Xeerarka Head Start iyo Child Care and Development Block Grant (U.S. Department of Health and Human Services & U.S. Department of Education, 2015).

Sidee ayuu daryeelka loo wada dhan yahay ee dhammaan Dhallaanka iyo carruurta socod-baradka ah U taageeraa Natiijooyin Wanaagsan oo dhanka Carruurta ah?

- ◆ Cilmi-baaristu waxay muujinaysaa in waayo-aragnimooyin -tayo sare leh oo loo habeeyey si gaar ah inta lagu jiro dhallaannimada iyo carruurnimada hore ay taageeraan Waynaanta Maskaxda ilmaha, isdhexgalka carruurta kale, isla markaana ay dhisaan saldhig adag oo horumarineed iyo waxbarasho ee dhammaan carruurta (National Scientific Council on the Developing Child, 2007).
- ◆ Daryeelka loo wada dhan yahay ee firfircoon wuxuu faa'iido u leeyahay dhammaan carruurta, wuxuuna taageeraa carruurta leh naafonimo si ay u gaaraan horumar la taaban karo oo dhanka korriinka iyo waxbarashada ah (Green et al., 2014).
- ◆ Carruurta lagu daro barnaamijyada daryeelka waxay helaan fursado muhiim ah oo ay ku horumariyaan isdhexgalka carruurta-asaagooda ah, wada-xiriirka, iyo-xirfadaha xalinta dhibaatooyinka (Justice et al., 2014).
- ◆ Cilmi-baarista lagu sameeyay carruurta si caadi ah u korra waxay muujinaysaa natiijooyin korriin, bulsheed, iyo aragtiyeed oo wanaagsan marka ay ku sugan yihiin jawi loo wada dhan yahay (Cross et al., 2004).

Qorshaynta Hirgelinta Daryeelka Loo Wada Dhan Yahay ee Goobaha Daryeelka Carruurta ee Kala Duwan

Yoolka: Barnaamijyada-tayada sare leh ee dhallaanka iyo carruurta socod-baradka ah waa kuwo loo wada dhan yahay dhammaan carruurta, oo ay ku jiraan carruurta leh naafonimo la aqoonsaday iyo carruurta u baahan gargaar ama taageero dheeraad ah sababo la xiriira maaraynta shucuurta, , caafimaadka, ama arrimo korriineed.

- ◆ Si firfircoon u diiwaangeli carruurta leh naafonimo ama dib-u-dhac korriineed.
- ◆ Hirgeli hagitaan qoraal ah oo taageera ku-daridda dhallaanka iyo carruurta socod-baradka ah dhammaan barnaamijka. Hagitaankan waxa ku jira buug-gacmeedyo loogu talagalay shaqaalaha iyo qoysaska kuwaas oo wadaaga muhiimadda daryeelka loo wada dhan yahay iyo, hababka lagu dhaqan geliyo.
- ◆ XAQIIJI in dhammaan shaqaaluhu fahmaan oo ay buuxiyaan masuuliyadaha sharci iyo anshax ee bixinta taageero iyo adeegyo loogu talagalay dhallaanka iyo carruurta socod-baradka ah ee ku jira goobaha daryeelka loo wada dhan yahay.
- ◆ Bixi helitaan ku aaddan taageerooyin gaar ah, oo samee iskaashi rasmi ah lala yeesho la-hawlgalayaasha bulshada.
- ◆ Samee sharraxaado cad oo waajibaadka shaqada ah oo loogu talagalay daryeel-bixiyeyaasha dhallaanka iyo carruurta socod-baradka ah kuwaas oo ku jira filashooyin la xiriira daryeelka loo wada dhan yahay. Filashooyinkani waxa ka mid ah dhisidda xiriir lala yeesho qoysaska iyo la shaqaynta khabarada bixiya taageerada hore ee korriinka carruurta.
- ◆ Ka qaybgal, samee, ama u dood horumarinta xirfadeed ee dhiirrigelisa daryeelka loo wada dhan yahay. Xooji horumarinta xirfadeed ee daryeel-bixiyeyaasha iyo maamulayaasha ee la xiriirta ku-daridda dhallaanka iyo carruurta socod-baradka ah ee leh naafonimo ama dib-u-dhac korriineed, iyo kobcinta iskaashi lala yeesho qoysaska iyo khabarada bixiya taageerada hore ee korriinka carruurta.
- ◆ Adeegso hab dib-u-eegis oo ula kac ah si joogto ah loo xoojiyo daryeelka loo wada dhan yahay ee guud ahaan xarunta ama barnaamijka daryeelka carruurta ee qoyska.

Tixraacyada

- Waaxda Waxbarashada California. (2009). *Ku qaybgalintu waa wax shaqaynaysa (Inclusion works)! Abuuridda barnaamijyo daryeel carruur oo dhiirrigeliya ka qaybgalinta carruurta leh baahiyo gaar ah*. Waaxda Waxbarashada California.
- Center on the Developing Child. (2012). *Hawl Fulinta (Executive function): Xirfadaha nolasha iyo waxbarashada* [InBrief summary]. <http://developingchild.harvard.edu/resources/inbrief-executive-function/>
- Cross, A. F., Traub, E. K., Hutter-Pishgahi, L., & Shelton, G. (2004). Hab-dhaqannada ka qaybgalinta waxay taageeraan horumarinta aragtiyo togan oo ku saabsan dadka leh naafonimo ama dib-u-dhacyo koritaan. *Topics in Early Childhood Special Education*, 24(3), 169–183.
- Green, K., Terry, N. P., & Gallagher, P. A. (2014). Horumarka xirfadaha luqadda iyo wax akhriska ee carruurta leh naafonimo marka ay ku jiraan fasallada Wax Akhriskaa Hore (Early Reading First) ee loo wada dhan yahay. *Topics in Early Childhood Special Education*, 33, 249–259.
- Hebbeler, K., Spiker, D., Bailey, D., Scarborough, A., Mallik, S., Simeonsson, R., & Singer, M. (2007). *Faragelinta taageerada hore ee dhallaanka iyo carruurta socod baradka ah ee leh naafonimooyin iyo qoysaskooda: Ka-qaybgalayaasha, adeegyada, iyo natijoooyinka* [Warbixinta ugu dambaysa ee Daraasadda Qaranka ee Faragelinta Taageerada Hore ee Carruurnimada]. Waaxda Waxbarashada Maraykanka
- Justice, L. M., Logan, J. R., Lin, T. J., & Kaderavek, J. N. (2014). Saamaynta ay saaxibada ku leeyihiin waxbarashada carruurnimada hore ee: Tijaabinta mala-awaalka ku saabsan ku darista waxbarashada gaarka ah. *Psychological Science*, 25(9), 1722–1729.
- Lally, J. R., & Mangione, P. L. (n.d.). *Xog ku saabsan Barnaamijka Xannaanada Dhallaanka/Ilmaha socod baradka ah*. WestEd; Waaxda Waxbarashada California. Waxaa la soo xigtay Juun 10, 2020, waxaana laga soo xigtay <https://www.pitc.org/about>
- Gollaha Sayniska Qaranka ee Ilmaha Koraaya (National Scientific Council on the Developing Child.). (2007). *Sayniska horumarinta dhallaanka (The science of early childhood development) Xiritaanka farqiga u dhexeeya waxa aan ognahay iyo waxa aan samayno*. Waxaa la soo xigtay Juun 10, 2020, waxaana laga soo xigtay <http://developingchild.harvard.edu/resources/the-science-of-early-childhood-development-closing-the-gap-between-what-we-know-and-what-we-do/>
- Raikes, H., & Edwards, C. (2009). *Kordhinta qoob ka ciyaarka daryeelka dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah (Extending the dance in infant and toddler caregiving)*. Paul H. Brookes Publishing Company, Inc.
- Waaxda. Department of Health and Human Services & U.S. Waxbarashada ee Maraykanka. (2015). *Bayaanka siyaasadda ee ku saabsan ka qaybgalinta carruurta naafada ah barnaamijyada waxbarashada carruurnimada hore*. <http://www2.ed.gov/policy/speced/guid/earlylearning/joint-statement-full-text.pdf>

Xarunta Dhisidda Awoodda Gobollada (State Capacity Building Center, SCBC) waxay la shaqaysaa hoggaamiyayaasha gobollada iyo dhulalka ay dawladdu xukunto iyo la-hawlgalayaashooda si ay u abuuraan nidaamyo iyo barnaamijyo carruurnimada hore ah oo hal-abuur leh kuwaas oo sare u qaada natijoooyinka carruurta iyo qoysaska. SCBC waxaa maalgelisa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka, Maamulka Carruurta iyo Qoysaska, Xafiiska Daryeelka Carruurta.

**State Capacity Building Center,
A Service of the Office of Child Care**

9300 Lee Highway
Fairfax, VA 22031

Taleefoonka: 877-296-2401
limaylka: CapacityBuildingCenter@ecetta.info

Isdiwaangeli si aad u hesho Wararka cusub
http://www.occ-cmc.org/occannouncements_sign-up/

